

Maxaa ku dhacaya ilmahayga ka dib markuu dhasho?

Haddii aad u baahan tahay in lagaa daweeyo cudurka waraabowga xilliga uurka, ilmahaaga wuxuu u baahan doonaa inuu baaritaan ka helo dhakhtarka takhasuska leh ee carruurta ka dib dhalmada iyo in lagu sameeyo xoogaa baaritaano dhiig ah. Tiro aad u yar oo caruur ah ayaa laga yaabaa inay u baahdaan inay isbitaalka ku sii jiraan si loogu sameeyo daawaynta antibiyootiga.

Ilmaha ayaa waxaa lagu samayn doonaa dabagal ilaa dhawr bilood ka dib markuu dhasho si loo xaqiijiyo in uu caafimaad qab ku joogo.

Badbaado miyaa inaan ilmahayga naasnuujiyo haddii la iga baaro oo la iga helo cudurka waraabowga?

Haa, waad naasnuujin kartaa ilmahaaga.

Yaa u baahan inuu ogaado inaan qabo cudurka waraabowga?

Waa muhiim, iyadoo la helayo ogolaanshahaaga, in dhammaan xirfadlayaasha daryeelka caafimaadka ee ku lug leh daryeelkaaga iyo daryeelka ilmahaaga ay ka warqabaan cuduradaada si ay u xaqiijiyaan in adiga iyo ilmahaaga aad heshaan daaweyn waxtar leh.

Macluumaad dheeraad ah



Macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan cudurka waraabowga ayaa laga heli karaa: www.nidirect.gov.uk/articles/antenatal-infectious-disease-screening



Faahfaahinta rugaha caafimaadka galmada ama 'Genitourinary Medicine' (GUM) ee Northern Ireland waxaa laga heli karaa: www.sexualhealthni.info/genitourinary-medicine-gum-clinics



Public Health Agency

12-22 Linenhall Street, Belfast BT2 8BS.
Tel: 0300 555 0114 (local rate).
www.publichealth.hscni.net

Find us on:



Cudurka waraabowga: waxa ay ka dhigan tahay natiijada togan ee baaritaankaaga



Baaritaankaagii dhawaa wuxuu muujiyay inaad qabto caabuq loo yaqaano waraabow/siflis.

Buug-yarahan waxa uu sharaxayaa waxa uu yahay cudurka waraabowga iyo waxa ay uga dhigan tahay uurkaaga iyo ilmahaaga.

Waa maxay cudurka waraabowga?

Waraabowga waa caabuq bakteeriyo ah. Badanaa lama dareemo maadaama calaamadaha iyo astaamaha aysan had iyo jeer ahayn kuwo muuqda. Haddii aan la daweyn, cudurka waraabowga waa xaalad caafimaad oo halis ah oo u gudbi karta heerar kala duwan oo socon kara toddobaadyo, bilo iyo xitaa sannado wuxuuna idin horseedi karaa dhibaatooyin caafimaad oo halis ah adiga iyo ilmahaagaba.

Sidee loo kala qaadaa cudurka waraabowga?

Cudurka waraabowga waxaa dadka kale loogu gudbin karaa:

- xiriir toos ah oo la yeelashada/taabashada boogta qof qaba waraabowga (xanuun), caadi ahaan inta lagu jiro galmada aan la iska ilaalin
- wadaagista cirbadaha ama qalabyada isticmaalka daroogada/daawooyinka ee ku wasakhaysan bakteeriyada
- isku gudbinta hooyada iyo ilmaha xilliga uurka ama xilliga dhalmada.

Daaweynta uurka

Waxaa lagu gudbin doonaa rugta caafimaadka galmada (sidoo kale loo yaqaano rugta 'Genitourinary Medicine') halkaas lagu go'aamin doono daawaynta aad u baahan karto.

Cudurka waraabowga waxaa lagu daweyn karaa daawaynta antibiyootiga waxaana muhiim ah qofka uu dhamaysto koorsada daawaynta oo dhammaystiran.

Xataa haddii hore lagaaga daaweeyay cudurka waraabowga, dib ayaad u qaadi kartaa cudurka oo waxaad u baahan kartaa in dib lagu daaweeyo. Kooxda caafimaadka galmada ayaa sidoo kale ku talin doona in lamaanahaaga la baaro lana daweeyo haddii loo baahdo si aysan kuu qaadsiiin cudurka kadib

marka lagu daaweeyo. Waxaad u baahan doontaa inaad iska ilaaliso inaad xiriir galmo la samayso lamaanahaaga ilaa aad labadiinuba ka dhammaysataan daawaynta. Haddii aad iska beddesho lamaanaha inta aad uurka leedahay waxa laga yaabaa inaad u baahato in dib lagu baaro. Waydii umulisadaada ama kooxda caafimaadka galmada wixii ku saabsan dib kuu baaritaanka haddii aad ka welwelsan tahay.

Ilaalinta ilmahaaga

Inaad qaado cudurka waraabowga xilliga uurka waxay la macno tahay in infekshanka uu u gudbi karo ilmaha uurka ku jira wakhti kasta inta lagu jiro xilliga uurka ama dhalmada, taas oo sababaysa xaalad caafimaad oo loo yaqaano cudurka waraabowga ee lagu dhasho, kaas oo saameyn mudd-dheer ku yeelan kara ilmahaaga.



Cudurka waraabowga ee lagu dhasho wuxuu u badan yahay inuu u gudbo ilmahaaga inta lagu jiro marxaladaha hore ee caabuqaaga wuxuuna kordhin karaa halista ah in ilmaha uu noqdo dhicis, dhasho isagoo mayd ah ama in ilmaha uu dhasho kahor wakhtigii loogu talagalay.

Cudurka waraabowga ee lagu dhasho waxaa lagaga hortagi karaa in la qaato daawaynta antibiyootiga ka hor inta aanu ilmahaaga dhalan, iyo haddii lagama maarmaan ay noqoto in ilmahaaga la siiyo daawaynta antibiyootiga ka dib markuu dhasho.

Runtii aad bay muhiim u tahay inaad ka xaadirto ballamaha rugta caafimaadka galmada oo aad hesho daawayntaada sida ugu dhakhsaha badan ee suurtagalka ah ka dib marka la ogaado inaad qabto cudurka si gacan looga gaysto ka hortagga in caabuqa uu u gudbo ilmahaaga.

Daawaynta cudurka waraabowga ee xilliga uurka ma tahay mid badbaado leh?

Daawaynta antibiyootiga (sida caadiga ah penicillin) waa mid badbaado leh inta lagu jiro uurka waxna ma yeeli doonto ilmahaaga. Haddii aad xasaasiyad ka qabto penicillin, dhakhtarka wuxuu kaala hadli doonaa daaweyn kale. Mararka qaarkood haddii lagu daweeyo iyadoo caabuqa waraabowga uu marayo marxaladaha hore, daaweynta waxay sababi kartaa falcelin/xasaasiyad waqti gaaban ah oo laga yaabo inay ka mid tahay jirro 'u eg iflo' taas oo badanaa socota ilaa dhowr maalmood.

Sida ugu fiican ee aad u ilaalin karto ilmahaaga waa inaad dhamaysato daawaynta.

Sideen ku ogaan karaa in daaweynta ay shaqeysay?

Rugta caafimaadka galmada waxay kaa qaadi doontaa baaritaano dhiig oo dheeraad ah ka dib daawayntaada si loo xaqiijiyo in caabuqa uu kaa baaba'ay.

Dhiigaaga ayaa sidoo kale la baari doonaa ka dib marka ilmahaaga uu dhasho.